Aagga caasimaddu wuxuu go’aamiyay habab lagu xakamaynayo fidista safmarka Korona iyo nidaam hawleedyo lagu aqoonsanayo maqaayadaha halista ah iyo soojeedinta quseeya madallada gaarka ah oo horay aga hirgelinayo.

6.10.2020 08:15:48 | Magaalada Helsinki xafiiska magaalada

Kooxda iskudubbaridka Koronaha ee aagga caasimaddu waxay ka wlewelsan yahay fiditaanka uu degeenka ku fidayo safmarka Koroana waxayna ku dadaalayaan in la helo habab deegaanka ka yimid oo safmarka lagu xakameeyo. Waxaa kale oo hiigsiga ah in la taageero sidi ay bulshadu u ahaan lahaayeen mid furan. Aagga caasimaddu wuxuu ku jiraa marxalad safmarka oo xawli ah. Dhammaan awaamiirta ku saabsan marxaladda karaarka ee ay wasaaradda sooshalka iyo caafimaadku soo saartay waa laga hirgeliyay deegaanka. Soojeedinnada cusub iyo nidaam hawleedyada hadda la go’aamiyay waxay si gaar ah ugu wajahan yihiin ka hortagga fididtaanka safmarku uu ku fidayo maqaayadaha, adeegyada gaarka ah iyo kuwa dadweynaha iyo madallada gaarka ah. Soojeedinnada deegaanka iyo xadaymuhu waxay dhammaystirayaan qaanuunka iyo soojeedinadda dalka oo dhan.

Kooxda iskudubbaridka Koronaha ee aagga caasimaddu waxay go’aamiyeen nidaam hawleed oo lagu xoojinayo ilaalin waafaqsan sharciga cudurada faafa. Hiigsiga nidaam hawleedku waa in waxqabad rasmi ah wax looga qabto habdhaqanka halista ah ee maqaayadaha halista lagu arko.
HUS iyo magaalooyinkuba waxay nidaam hawleedka ku aqoonsanayaan maqaayadaha halistooda sarreyso ee aagga caasimadd, kuwaas oo aan

raacin waajibaadyada sharciga cudurada faafa iyo xeerarka waafaqsan ee laga dejiyay ama aanan awoodin in ay xaqiijiyaaan xaaladaha ammaanka caafimaadka. Waaxda maamulka gobolka Koonfurta Finland wuxuu si qoondeysan u hibinayaa maqaayadaha. Haddii ammaanka caafimaadka ay ka soo baxayaan cillado ama waxqabadka halistiisu sarreyso uu sii socdo, Waaxda maamulka gobolka Koonfurta Finland wuxuu bixin karaa awaamir waxqabadka lagu saxayo ama maqaayada wakhti cayiman lagu xirayo. Nidaam hawleedku isla hadda ayuu dhaqangelayaa. Haddii uu nidaam hawleedku uu xooggan yahay, waxa ugu fiican ee ka dhalan kara waa, in aan loo baahan waxqabadyo cusub oo si isku mid ah u quseynaya maqaayadaha oo dhan.

Kooxda iskudubbaridka Koronuhu waxay sidoo kale ganacsatada gaarka ah, in ay macaamiishooda ka dalbadaan isticmaalmka af-shareerka xaalad kasta oo ay ku jiraan. Soojeedintu waxay quseysaa ganacsatada ay goobahoodu ka dhacaan kulamada macaamiisha, sida dukaamada, xarumaha dukaamada, adeegyada dhaqanka iyo dhacdooyinka isboortiga. Sharciga degsan ee hadda shaqaynayaahi ma suurragelinayo ku waajibinta isticmaalka af-shareerka marka la joogo goobaha adeegyada dadweynaha. Si kastaba ha ahaatee waxay kooxdu si xooggan ugu talinaysaa in af-shareerka lagu isticmaallo marxalad kasta oo jirta xittaa goobaha hawlwadeennada dadweynaha iyo adeegyada, sida gaadiidka dadweynaha, maktabadaha, madxafyada iyo adeegyada kale ee dhaqanka.

Waxaa intaas dheer oo ay kooxdu go’aamisay in ay si xooggan u soo jeediso u hoggaansamidda taxaddir gaar ah iyo dhowrsanaan marka la qabanqaabinayo madallada gaarka ah. Inta badan xaaladaha faafidda fayruska Korona waxay la xiriireen madallada gaarka ah ama wakhti ku qaadasha goobaha gaarka loo leeyahay. Soojeedinta xooggan waxay quseysaa tusaale ahaan xafladaha gaarka ah iyo qaadashada wakhtiga firaaqada ama qabanqaabinta madallada waxbarashada la xiriira.

“Safmarku wuxuu si welwel leh ugu fidiyaa aagga caasimadda. Waxaa intaas dheer in waxqabadyada xadeynta ee la sameeyay si looga hortago faafitaanka safmarfku ay sababeen dhibaatooyin bulsho iyo kuwa dhaqaale. Xaaladda safmarku waxay noqonaysaa mid wakhti dheer soconaysa hiigsigeenu waa ka hortagga faafitaanka fayruska ee bulshada dhexdeeda, sugidda awoodda xajinta ee daryeelka caafimaadka iyo in si gaar ah loo ilaaliyo dadka ku jira kooxaha cudurada u nugul, si awoodda xajintu ee bulshadu ay isla wakhtigaas u ahaato mid u wanaagsan sida ugu macquulsan. Waxqabadyada deegaanku hadda waa kuwa la taaban

karo, qoondaysan oo saameyn leh. Waxaan ku dadaalaynaa in aan si iskaashi leh oo fasiix ah aan farriinta u soo gudbinno", sidaa waxaa yiri maayarka Helsinki **Jan Vapaavuori**, Duqa magaalada Helsinki **Jukka Mäkelä**, Duqa magaalada **Ritva Viljanen**, maamulaha THL **Mika Salminen**, Maamulaha sare ee waaxda maamulka gobolka Koonfurta Finland **Merja Ekqvist** iyo maareeyaha HUS **Juha Tuominen**.

Kooxda iskudubbaridka Koronaha ee aagga caasimaddu waxay diyaarinaysaa go'aamin maxalli ah

Magaalooyinka Helsinki, Espoo iyo Vantaa, THL, HUS iyo waaxda maamulka gobolka Koonfurta Finland waxay 10ki Sebtember 2020 aasaaseen koox maxalli ah oo ka shaqeysa iskudubbaridka. Hiigsiga kooxda ee dabbaqaya nidaam hawleedyada maxalliga ah ee Wasaaradda sooshalka iyo caafimaadku waa xoojinta muuqaalka xaaladda iyo iskudubbaridka iyo diyaarinta waxqabadyada aagga iyo kuwa deegaanka. Kooxdan ka kooban hoggaanka sare waxay qaabilsan yihiin aasaaska aragtiada xaaladda ee diyaarinta go'aan gaarista iyo isudubbaridka. Hawlwadeen kasta wuxuu go'aankiisa ku gaarayaa si waafaqsan awooddiisa sharci. Kooxdu waxay xoojinaysaa wadashaqeynta aagga caasimadda ee socotay muddada lagu jiray xasaradda Koronaha oo dhan. Magaalada Helsinki waxay qaabilsan agaasina waxqabadka kooxda.

Macluumaadka dheeraadka ah:
Magaalda Helsinki: maayar Jan Vapaavuori / kaaliyaa gaarka ah Lotta Backlund, tel. +358 40 531 3076
Magaalada Espoo: duqa magaalada Jukka Mäkelä / xoghayaha duqa magaalada Stina Astala, tel. +358 43 826 5244
Magalaada Vantaa: duqa magaalada Ritva Viljanen / xoghayaha duqa magaalada Annamaija Vihervirta, tel. +358 40 527 4565
THL: Maamule Mika Salminen, tel. +358 29 524 8454
Waaxda maamulka gobolka Koonfurta Finland: Maamule sare Merja Ekqvist, tel. +358 29 5016 271
HUS: dhakhtar sare Markku Mäkijärvi / xoghayaha hoggaanka Jaana Niinivaara, teö. +358 50 4272 013
Wargelintan waxaa sida ugu dhakhsaha badan loogu daabacayaa bogga Hel.fi iyadoo lagu turjumay luqadda iswiidhishka iyo ingiriiska.

Linkiyada

Helsinki – macluumaadka hadda jira ee korona ku saabsan

janalka-Helsinki

THL: Macluumaadka hadda jira ee fayruska korona ku saabsan

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan soosaare magaalada Helsinki, xafiiska magaalada

Magaalada Helsinki, xafiiska magaalada
SB 1,00099 Magaalada Helsinki

09 310 1641
https://www.hel.fi

Xafiiska magaaladu waa hay'adda dhexe ee maamulka magaalada Helsinki hadafkeennu waa magaalo, dadka magaalada deggan siisa adeeg kan ugu fiican islamarkaasna ku horumarta tartanka sii xoogaysanaya. Waxaan magaaalada u cusboonaysiinaysaa si istaraatijiyada waafaqsan innagoo la shaqeynayna laamaha waxqabadka.

Qaybi

Haddii aanu iimaylku si fiican u muuqan, u wareeg kana aqrsio bogga Info ee STT